

**Abriil 3, 2025**

**Mawduuca:** Warbixinta Cusub ee Badbaadada Liidhka ee MPS - Isbeddellada Hoggaanka iyo Xiritaannada Dugsiga ee Sii Socda

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Milwaukee,

Waaxda Caafimaadka ee Magaalada Milwaukee (MHD) iyo Dugsiyada Dadweynaha Milwaukee (MPS) waxay sii wadaan inay si dhow uga wada shaqeeyaan ilaalinta caafimaadka iyo badbaadada ardayda iyo shaqaalaha iyagoo wax ka qabanaya khataraha liidhka ee dhismayaasha dugsiga. Waxaana ka mid ah kormeerro joogto ah, nadiifin, dib-u-habeyn, iyo hababka isla xisaabtanka oo la wanaajiyo.

### **Warbixinta Cusub ee Hogaaminta Xarumaha**

Laga bilaabo usbuucan, Sean Kane uma sii shaqaynayo Agaasimaha Xarumaha iyo Adeegyada Dayactirka ee MPS ahaan. Degmadu waxay si firfircoon u raadinaysaa beddelkiisa.

Si ku meel gaar ah, Michael Mannan, Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Deegaanka ee MHD (HEH), ayaa si wakhti buuxda ah u taageeri doona MPS. Mannan waxa uu la imaanayaa in ka badan 25 sano oo waayo-aragnimo ah oo ku aadan fulinta xeerarka, qiimaynta khatarta liidhka, iyo yaraynta khatarta deegaanka. Waxa uu shahaado ku haystaa baaritaanka liidhka iyo asbestos-ka iyo yareynta labadaba waxana uu hore ugu soo shaqeeyay qiimaynta khatarta liidhka muddo shan sano ah MHD.

Doorarka Mannan wuxuu diiradda saari doonaa gacan ka gaysashada wanaajinta khatarta liidhka, dib u eegista borotokoolka nadaafadda, hagidda kormeerka joogtada ah, iyo kala-talinta horumarinta Qorshaha Waxqabadka Hogaaminta ee MPS. Wadashaqeyntan la xoojiyey waxay xoojinaysaa mudnaanta la wadaago ee ah ilaalinta badbaadada ardayda iyo shaqaalaha.

### **Horumarka Laga Sameeyay Dugsiyada Sida Ku Meel Gaarka Ah Loo Xirey**

Ilaa usbuucan, Dugsiga Fernwood Montessori, Xarunta Carruurnimada Hore ee Starms, iyo Dugsiga LaFollette ayaa weli sii xirnaanaya. Dugsiyadan dib looma furi doono ilaa MHD ay xaqiijiso in dhammaan heerarka badbaadada liidhka la buuxiyay.

Waxaan sii wadi doonaa inaan warbixino cusub oo joogto ah siino qoysaska ay saamaynta soo gaartay waxaan kugu soo wargelin doonaa isla marka la xaqiijiyo qorshayaasha dib u furista dugsiyada.

### **Ka Baarista Liidhka ee Carruurta**

Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ardayda MPS iyo carruurta da'doodu ka yar tahay 6 laga baaro u bayla noqoshada liidhka iyada oo loo marayo adeeg-bixiyayaasha daryeelka aasaasiga ah. Sida kaliya ee lagu ogaan karo in ilmaha uu u bayla noqday macdanta liidhka waa iyada oo laga baaro. Qoysasku waxay adeeg-bixiyehooda ka qabsan karaan ballanta baaritaanka caafimaad ama waxay booqan karaan rugta baaritaanka liidhka ee bilaashka ah. Taariikhaha rugta caafimaadka iyo goobaha waxaa laga heli karaa:

- [milwaukee.gov/MPS-Lead](https://milwaukee.gov/MPS-Lead)
- [mpsmke.com/mpsleadreport](https://mpsmke.com/mpsleadreport)

Waanu ognahay in wakhtigani yahay wakhti walaac leh, waxaana kaaga mahadcelinaynaa dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga joogtada ah. Xaqiijinta jawi waxbarasho oo badbaado iyo caafimaad leh ayaa weli ah mudnaantayada ugu sareysa.

Daacad kuu ah,

**Waaxda Cafimaadka Deegaanka**  
Waaxda Caafimaadka Magaalada Milwaukee

**Xafiiska Maamulka Dugsiga**  
Dugsiyada Dadweynaha Milwaukee